



## Rent Account Statement Caddeynta Koontada Ijaarka

West North West Homes waxay bixisaa caddeynta koontada ijaarka saddaxdii biloodba mar. Tan waxay qeexeysaa lacag bixinta oo dhan ee koontada lagu sameeyey saddaxdii bilood ee la soo dhaafay iyo haraaga koontada usbuucii.

Haddii aad qabto su'aal ku saabsan caddeynta, fadlan wac taleefanka 0800 9151113 ama 0113 3984708 Isniin – Jimce inta u dhaxeysa 8am iyo 6pm.

Hababka lacag bixinta iyo tafasiisha ururrada la-talinta lacagaha ayaa la s oo raaciyey caddeyntaan

## paying your rent Bixinta ijaarkaada

Ma ogeyd in uu jiro habab kala geddisan ee fudud ee aad u dhiibi karto ijaarkaada?

Dooro habka kuugu wanaagsan.

### Direct Debit Lacag Bixinta Tooska



habka ugu fudud ee lacag loo dhiibo, adigoo aan saf gelin! Oo keli ah foomka ka soo qaado mid ka mid ah xafiisyadeenna, buuxi foomka dibna u soo dir. Ma u baahnaan doontid in aad mar kale ka fekertid. Waxaad dooran kartaa inaad lacagta bixiso usbuucii ama bishii maalinta 1aad ama 17aad. Waxaan kuu sheegi doonnaa isbeddel kasta xusuusnoowna, Direct Debits waxaa daboolaaaya dammaanad dhinaceenna ah iyo mid bankigaada ah si loo xaqiijiyo in qalad kasta la saxo.

### Standing Order Amarka Taagan

Oo keli ah waxaad u baahan tahay inaad hal foom buuxiso, aad u dirto bankigaada sidaa ayaa waxoo dhan lagu habeeyey.



Ka soo qaado foom mid ka mid ah xafiisyadeenna. Habkaan ayaad isticmaali kartaa si aad lacag u bixiso bishii. Waxay uga geddisan tahay Direct Debit, Standing Order waa qorsheyn u dhaxeysa adiga iyo bankigaada. Adiga ayaa awoodda leh sidaa darteed waxaad u baahan tahay inaad bankigaada u sheegto isbeddel walba. Nambarka tixraaca ee aad u baahan tahay inaad xigato waa A, uu raacayo tixraacaada 9 numbar, sort koowdkeenna 57-12-72 nambarka xisaabteenna (akowtigeenna) 00000000. Wixii tafaasiil ee lacag bixintaada billaha ah e-mail noogu soo dir [hsg.debit/credit@leeds.gov.uk](mailto:hsg.debit/credit@leeds.gov.uk) ama taleefanka (0113) 247 6192

### By Telephone Taleefan ahaan

Haddii aad leedahay kaarka Debit Card waxaad lacagta ku bixin kartaa taleefanka. Oo keli ah wac taleefanka 0113 3957100 (24saac) adigoo tafaasiisha kaarkaada siinaaya. Fadlan xusuusnoow in ay diyaar kuu ahaadaan tixraaca ijaarkaada iyo inta lacag ee aad jeceshahay inaad bixiso. Haddii aad jeceshahay in aad la hadasho cidda shaqada ku howlan wac 0800 9151113 ama 0113 3984708 Isniin – Jimce inta u dhaxeysa 8am and 6pm.



### Telephone Banking Bankiyeyn Taleefan ahaan

Samee wicitaan sahlan ee bankigaada ama Building Society-gaada, lacag bixin toos ahna si degdeg ah ayaa loo sameynaayaa. Nambarka tixraaca aad u baahan doonto waa A, uu raacayo tixraaca 9-kaada nambarka, sort koowkeenna 57-12-72 iyo nambarka xisaabta (akowntiga) 00000000.



## Post Office Girobank / PayPoint / Payzone

Waxaad I jaarkaada ka dhiibi kartaa iyadoo kharash laan lagu saareynin xafiis kastoo boosta ah iyo dukaammada qaarkood kuwaasoo xayeysiya PayPoint ama Payzone. Si aad u istimaasho waxaad u baahan doontaa kaar balaastiig yar ee la mariyo mashiinka. Haddii aadan helin kaarka ijaarka ee marinta mashiinka, waxaa lagu heli karaa in lala xariiro Xafiiskaada Guryeynta Deriska (Neighbourhood Housing Office). Waxay kugu qaadaneynsaa 7-10 maalmood inaad kaarkaada boostada ku hesho.



## Online Payments

### Lacag Bixinta Internetka

Waxaad hadda awooddaa inaad ijaarkaada ku bixiso habka internetka ee [www.leeds.gov.uk](http://www.leeds.gov.uk). Qeybta howlaha laynka (under Online Services).



## Salary / Wage Deduction

### Mushahar Ka Jarid

Shaqaalaha Guddiga Degmada Leeds (Leeds City Council) waxay sameyn karaan in ijaarkooda si toos ah looga jaro mushaharkooda. Fadlan soo wac taleefanka 0113 247 6192 ama kala xiriir Xafiiskaada Guryeynta Deriska (Neighbourhood Housing Office) wixii tafaasiil ah.



## Leeds City Credit Union

Waxaad kaloo aad lacag bixin ka sameyn kartaa Leeds City Credit Union. Tafaasiil dheeraad ah wac taleefanka 0113 214 5252.

## NAMBARRADA TALEEFANNADA LA TALINTA LACAGAHA

Citizens Advice Bureau  
Tel: 0870 120 2450

Money Advice Team  
Tel: 0113 247 6035

Consumer Credit Counselling Services  
Tel: 0800 138 1111

National Debtline  
Tel: 0808 808 4000

### **Xusuusnoow ... ijaarkaada waa in loo dhiibaa usbuuc walba horumarin ahaan.**

Haddii aadan dhiibeynin labadii usbuuc mar ama bil, hubi inaad dhiibto usbuuca ugu horreeya ee wareegga si ay xisaabtaada (koontadaada) deyn u gelin.

### **Ma qaadataa Macaashka Guryeynta?**

Haddii aad qaadatid fadlan ogoow in Hey'adda Macaashyada Leeds (Leeds Benefits Service) ay dib u fiiriso codsiyada oo dhan (claims). Waxay kuu soo qori doontaa warqad ay kaaga codsanaayaan inaad dib u cusbooneysid tafaasiisha dakhliga iyo inta qof ee kula nool. Si aad u sii qaadato Macaashka Guryeynta aadna isaga ilaaliso in ay deynta kugu kororto, fadlan si degdeg ah ugu jawaab Hey'adda Macaashyada Leeds (Leeds Benefits Service).

Fadlan Ogoow: Haddii aad ijaarkaada bishii aad ku bixiso lacag bixinta tooska (Direct Debit) waxaa jiri kara marar ay koontadaada ay deyn ku jirto. Tan sababteedu waa habka lacag bixinta tooska (Direct Debit System).

Si kastaba, haddii Lacag Bixinta Tooska ay qaldan tahay fadlan ha ka gabban inaad nala soo xariirto

.

### **Ka Hubi Lacagta Ijaarka Internetka**

Waxaad hadda awooddaa inaad lacagtaada ijaarka iyo lacag bixinnada cusub inaad ka hubiso internetka, la heli karo 24/7.

Si aad isu diiwan geliso, booqo cinwaanka [www.wnwhl.org.uk](http://www.wnwhl.org.uk) ka dibna guji ama riix Rent Payments Arrears and Benefit advice, ka dibna ka hubi dhaqdhaqaaqa lacagta ijaarkaada internetka.

### **U SII GUDUBIN...**

**Ku bixinta lacag bixinta tooska (Direct Debit) ama Amarka taagan ( Standing Order) oo keli ah kuuma masaabaxaayaan inaad qorsheyso lacgahaada laakin ...**

### **WAXAAD KU GUULEYSAN KARTAA £250! AMA £500! DHAMMAADKA LACAG SANNADEEDKA**

Waxaa jira 4 jaa'iso in la qaato ay tahay afartii biloodba haddii aad ijaarkada ku bixiso lacag-bixinta-tooska ah (Direct Debit) ama Amarka Taagan (Standing Order) ama haddii koontadaada tahay mid aan deyn lagu yeelan. Si habsami ah ayaa lagaaga qeyb gelinaayaa tartanka waxaana lagula soo xiriiri doonaa haddii aad guuleystaha noqoto.

Guuleystayaasha waxaa lagu magacaabi doonaa warsidaheenna Ijaartaha "Buzz" kaasoo guriga laguugu keeni doono afartii biloodba mar.



**Wac 0800 9151113 si talo lagu siiyo ama booqo Xafiiskaada Guryeynta Deriska (Neighbourhood Housing Office)**

Fadlan ma buuxin kartaa akhbaarta hoose mana ku soo diri kartaa baqshadda lacag la'aanta ah.

Akhbaartaaan habkaan ah waxtar ma tahay?

Haa / Maya

Fadlan sheeg haddii aad jeclaan lahayd howshaan in ay sii socoto?

Haa / Maya

Magacaada:

Cinwaankaada:

**Waxaa laga yaabaa inaad hesho nuqul dheeri ah oo luqadda Ingiriiska ah.**